



# Hage loogu talagalay haweenka uurka yeelan kara, kuwa uurka leh ama naaska nuujinaya ilmahooda



Tallaalka coronavirus waxaa uu  
marey tijaabooyin badan si loo  
hubiyo in uu badbaado-qab yahay



Haddii aad uur leedahay, waa in  
aad qaadataa labada qaadasho ee  
tallaalka coronavirus si adiga iyo  
ilmahaagaba loo ilaaliyo. Tallaalada  
ma ku keeni karaan adiga iyo  
ilmahaaga aan dhallan caabuqa  
coronavirus.



Tallaalka Coronavirus waxaa loo  
bixiyaa laba duritaan. Haddii aad  
qaadatey qaadashada koowaad  
ka hor inta aadan uurka yeelan,  
waxaad qaadan kartaa qaadashada  
labaad iyada oo ku xiran in  
aadan waxyeello daran ka qaadin  
qaadashadii koowaad.



Tallaalada coronavirus ee Pfizer iyo  
Moderna ayaa loo doorbidayaa  
haweenka uurka leh. Haddii aad  
qaadashada koowaad qaadatey  
Astrazeneca, isla isaga ayaad  
qaadashada labaad ku qaadan  
kartaa, balse marka hore kala hadal  
dhakhtarkaaga iyo kalkaaliyahaaga  
halista xinjirowga dhiiga.



Nuujinta naaska dhab ahaan aad ayey adiga iyo ilmahaagaba ugu fiican tahay.



Khubaro ka tirsan Gudiga Wadajirka ah ee Talaalka (JCVI) ayaa sheegaya inaad qaadan karto tallaalka inta aad naaska nuujineyso.

Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) ayaa sidoo kale ku raacay in haweenka naas nuujinaya ay qaadan karaan tallaalka.



Haddii aad ilmahaaga dhashey waa in aad tallaalkaaga u qaadataa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.



Badbaado-qab ayey ugu sugaran tahay in aad uur yeelatid ka dib marka aad tallaalka qaadatid.



Tallaalka, wuxuu caawinayaa ilaalinta kuwa ugu nugul.